


# Xeerka Dhaqanka Ganacsiga iyo Anshaxyada

## GUDAHA

Farriin ka socota Madaxa Shirkadeena iyo Guudmar
Heerarka U hogaansanaanta
Filashooyinka iyo Wareegyada
Ilaalinta Warbixinada Niyad Wanaaga lagu sameeyay ee Ku Xadgudubka Siyaasadaha Sharciyada; Warbixinta Qarsoon

# Xeerka Dhaqanka Ganacsiga iyo Anshaxyada

## Guudmar

Xeerka Dhaqanka Ganacsiga iyo Xeerka Anshaxa ee CONMED ayaa khuseeya Shirkadda CONMED Corporation iyo dhammaan kaabayaasheeda ay maamusho, adduunka oo dhan. Waxay khuseysaa dhammaan agaasimayaasha CONMED, saraakiisha iyo shaqaalaha: laga bilaabo Madaxa Shirkadda (CEO), Madaxa Dhaqaalaha (CFO), Kontroolaha iyo inta kale ee maamulka fulinta, ilaa kormeerayaasha soosaarista iyo shaqaalaha saacadlaha ah ilaa qof kasta oo iibiye ah.

Xeerka ma qeexayaa keliya sharciyada naga go'aan inaan raacno, balse wuxuu sidoo kale sheegayaa mabaadi'da iyo qiyamyada aasaasiga u ah sida aan u hawlgalno oo aan u gaarno go'aanada. Xeerka ayaa si dheeri ah lagu sharraxaa laguna hirgaliyaa siyaasadaha iyo barnaamijyada Shirkadda iyadoo ku xiran sida ay u rabto shirkadda waqti ka waqti.

### Hawlaheena maalinlaha ah waxay raaci doonaan xeerarka soo socda:

**Waxaan u hogaansami doonnaa sharciga.**

**Waxaan qaadi doonaa ficilo ku salaysan niyad wanaagsan.**

**Waxaan ku dadaali doonnaa inaan dhisno aaminaad, muujinayo ixtiraam, una shaqeyno daacadnimo.**

**Waxaan tixgelin doonnaa saameynta go'aannadayaga ku yeelanayaan dhammaan saamileyda ay khuseeyaan waxaana ku dadaali doonno inaan gaarno natiijooyin cadaalad ah.**

Sumcadda iyo ugu dambayntii faa'iidada CONMED waxay ku xirantahay agaasime kasta, sarkaal kasta, maamule kasta, shaqaale kasta, iyo wakiil kasta, oo dhaqmo hab anshaxeed. Sidaas awgeed, dhammaantood waxay mas'uul ka yihiin u hoggaansanaanta Xeerkan.



# Fariin ka socoto Madaxa Shirkadda (CEO)

Ku socoto dhammaan shaqaalahayaga qiimaha badan

Madaama aanu nahay mid ka mid ah shirkadaha ugu weyn ee soosaaro qalabka caafimaadka, sheegis umaa baahno, in aan ku lug leenahay ganacsi aad u tartan badan iyo inay bixiyeyaasha daryeelka caafimaadku naga rajeynayaan nagana dalbanayaan wax badan. Dalabaadkan ayaa saameyn kugu leh, iyadoo aan la eegayn booska aad ka joogtid ururka. Haddii shaqadaadu kaaga baahan tahay inaad si dhakhso ah oo saxna ah uga shaqeyso dalabaadka, inaad soosaarto badeeco badan oo hufan oo xakamayn tayo leh, ama inaad maalin kasta kacdo xili hore si aad u samaysid iib dheeri ah, dhammaanteen waxaa caqabad nagu ah inaan helno hal abuur iyo qaabab cusub oo shaqada lagu qabto. Waxaan ku faraxsanahay dadaalkaas, waxaanna fursaddan uga faa'idaysanayaa inaan kaaga mahadnaqo gacan ka geysiyadaada, kuwaas oo kordhin doono, guusha shirkaddayada.

Isla markaana, waxaa lama huraan ah in midkeen kasta uu garto inaysan shaqo qabashada kaliya muhiim ahayn, balse sidoo kale sida aan u gaarno natiijooyinkayaga ay muhiim tahay. Sumcadda CONMED — iyo sidoo kale guul kasto oo shaqsiyadeed — ayaa nooga baahan inaan shaqada qabano, una qabano sida saxda ah. Sida waligeedba ay ahayd, sameynta waxa saxda ah ayaa dhaafsan addeecista sharciyada xukuma ganacsiyaga.

Waxay xaqiiqdii ka dhigan tahay inaan ku dhaqano daacadnimo buuxda maalin kasta iyo wax kasta oo aan sameyno.

Loo-shaqeeyahaaga ahaan, waajibaadka CONMED wuxuu dhaafsan yahay inay kuu sheegto inaad marwalba goobta shaqada ugu dhaqantid si xirfad iyo mid anshax leh. Xeerkan Anshaxa Dhaqanka Ganacsiga iyo Anshaxa, waxaan u dejinay qiyamyada naga dhigay Shirkadda aan maanta nahay horeyna noo wadi doona mustaqbalka.  Buug-gacmeedkani wuxuu sharaxayaa siyaasadaha asaasiga ah ee anshax marinta ee xukuma dhammaan shaqooyinka aan qabanno, wuxuuna dejinayaa masuuliyaadka iyo waajibaadka dhammaan shaqaalahayaga ee waafaqsan siyaasadahaas. Waxaan kaa codsanayaa inaad si taxaddar leh u akhriso, aadna sii wado dhaqanka ku dadaalka shaqada ee leh hufnaanta iyo xirfad-yaqaannimada kaasoo naga dhigay Shirkadda aan maanta nahay, isla markaana sii wadi doonto qaabeynta mustaqbalka Shirkaddayada.

Daacadnimo,

Curt R. Hartman
Madaxweynaha iyo Madaxa Shirkadda

# I. Heerarka U hogaansanaanta

## A. Tayada iyo Baadqabka

Qalabaadyaga ayaa adduunka oo dhan maalin kasta loo isticmaalaa ogaanshaha, daaweeynta, maareeynta iyo fududeeynta xaaladaha caafimaad si loogu suurtagaliyo bukaanada inay cimri dheer oo caafimaad leh ku sii noolaadaan. Sidaa daraadeed, qalabaadkayaga waa inay ahaadaan kuwo loo qaabeeyey loona soosaaray iyadoo tixgalinta koowaad la siinayo baadqabka iyo caafimaadka macaamiisheena iyo bukaanada. CONMED waxaa ka go'an joogteeynta nidaam tayo leh oo bixiya qalabaad iyo adeegyo badbaado leh oo wax ku ool ah kuwaas oo buuxiya baahiyaha iyo shuruudaha bukaanadayaga, macaamiishayaga, iyo daneeyayaasha shirkadda. CONMED waxay u hogaansami doontaa dhammaan heerarka sharciga iyo sharciyeynta, waxaana si sax ah kuna haboon wakhtiga loo dhamaystiri doonaa ta dhammaan kormeerka loo baahan yahay, baarista, iyo waajibaadka warbixinta.

Heerarka dhaqanka ee soo socda ayaa qeexaya rajooyinkayaga dhaqanka ee ugu hooseeya. Madaama heerarkani aysan saadaalin karin xaqiiqooyinka xaalad kasta oo gaar ah, waa in lagu tarjumaa laguna isticmaalaa qaab dhismeedka sharciyada iyo caadooyinka awoodaha aan ku shaqeyno. Sababaha sida "ma aha sharci darro" ama "qof walba wuu sameeyaa" cudurdaar la aqbali karo uma ahaan ku xadgudubka heerarkan dhaqanka. Waaxda Sharciga ee CONMED ayaa mas'uul ka ah ku isticmaalka heerarkan xaaladaha gaarka ah ee su'aalaha ka soo bixi karaan waxayna awood u leedahay inay u turjumto siyaasadahaan xaalad kasta oo gaar ah. Wixii su'aalo ah ee laxiriira sida siyaasadahaan loo turjumi karo ama loo isticmaali karo waa in loo jeediyaa Waaxda Sharciga ee CONMED.




## B. Waxqabad Cadaalad ah

Waxaan taariikh u leenahay ku guuleysiga tartan ganacsi oo cadaalad iyo daacadnimo ah. Ma raadsano faa'iidooyin tartan oo loo marayo dhaqamo ganacsi oo sharci darro ama anshax xumo ah. Shaqaale kasta, sarkaal kasta iyo agaasime kasta waa inuu ku dadaalaa inuu si cadaalad ah ula macaamilo adeeg-bixiyeyaasha, alaab-qeybiyeyaasha, tartamayaasha iyo shaqaalaha Shirkadda. Waa inuusan shaqaale, sarkaal ama agaasime si cadaalad-darro ah uga faa'iidaysan qof isagoo adeegsanaya kadeedis, qarin, si xun u adeegsiga macluumaadka mudnaanta leh, si khaldan usoo bandgigida xaqiiqooyinka muhiimka ah, ama fal kasta oo ah waxqabad cadaalad-darro ah. Haddii aad qabtid wax su'aalo ah oo ku saabsan dhaqan aad ku fikireyso inaad samaysid, waa inaad la xiriirtaa Waaxda Sharciga.

CONMED wuxuu u hogaansami doontaa sharciyada loollanka (oo sidoo kale loo yaqaan sharciyada tartanka) ee khuseeyo waxkasta oo aan ka ganacsano. Kama qaybqaadan doonno qaabeynta qiimo sharci daro ah; qoondeynta suuqa ama macaamiisha, ama xadista qiimo-sheegista. Ma siin doonno mana bixin doonno wax laaluush ah. Hadiyadaha ganacsiga ee caadada ah kuwaas oo inta jeer ee la bixinayo iyo qiimahooga uu macquul yahay ayaa la oggol yahay, hase yeeshe, hadiyad marnaba lama oggola haddii loogu talagalay in lagu beddesho eex samayn habboon ama haddii ay mamnuuc ka tahay siyaasadaha qaataha ama loo-shaqeeyaha. Dhammaan lacagaha ama wareejinada kale ee qiimaha ee la siinayo dhakhaatiirta iyo Xirfadleyaasha kale ee Daryeelka Caafimaad ayaa waafaqsanaan doona dhammaan shaciyada iyo qawaaniinta iyo iyadoo la raacayo Siyaasadda CONMED ee 'La-tashiga iyo Hawlaha kale ee lala yeelanayo Xirfadlayaasha Daryeelka Caafimaad iyo Hay'adaha Caafimaad".

Bixinta aan Haboonayn, ama laaluushka, ayaa mamnuuc ah haddii ujeedkoodu yahay inay saameyn ku yeeshaan ficilka ama go'aanka Sarkaal Ajnabi ah. Saraakiisha Ajnabiga ah kuma koobna kaliya hogaamiyayaasha la soo doortay iyo shaqaalaha wakaaladaha dowlada, balse waxaa sidoo kale ku jira ganacsiyada iyo shaqaalaha ganacsiyada ay leeyihiin dowlado ama wakaalado ajnabi ah (tusaale. Isbitaalada dowlada iyo dhakhaatiirta isbitaalada dowlada). Kahor intaadan siin ama aad u bixinin WAX lacag Sarkaal Ajnabi ah, waa inaad la tashataa Waaxda Sharciga.

**Shaqaaluhu waa inaysan marnaba kala heshiin tartamayaasha waxa ku saabsan:**

- Qiimayaasha (oo ay ku jiraan wixii ajuuro ah, kharash ah, lacag celin ama dhaqamada kale ee qiimeeynta ama siyaasada ah) ay ku bixin doonaan badeecad ama adeeg.
- Shuruudohooda iibka.
- Xuduudaha/aagga ay shirkad kastaa ku iibin doonto badeecadeeda.
- Macaamiisha ay shirkad kasta ka iibin doonto badeecadeeda.
- In laga iibinayo ama aan laga iibinayn macmiil gaar ah.

## C. Saxnaanta Diiwaanada

Dhammaan hantida, deymaha, dakhliyada, kharashyada, iyo is-weydaarsiga ganacsi waa in si buuxda oo sax ah looga muujiyaa buugaagta iyo diiwaanada CONMED, iyadoo la raacayo sharciyada khuseeya, mabaadi'da la aqbalo ee xisaabaadka, iyo siyaasadaha maaliyadeed ee CONMED. Ma jiraan koonto qarsoodi ah ama xisaabaad aan dheelitir lahayn oo la samayn doono ama loo joogteyn doonin ujeedo kasta.

Ku been abuurka diiwaannada ama dukumiintiyada waxay shaqaalaha u horseedi doonaan ficil edbin ah, waxayna ciqaab madani ah iyo mid dembiyeed u keeni karaan shirkadda iyo shaqsiyaadka geeystay xadgudubka.

**Madaama CONMED ay tahay shirkad ay dadweynaha ka gancsadaan, waxaa looga baahan yahay inay xaqiijiso in bayaanada maaliyadeed ee Shirkadda iyo warbixinada ay si sax ah u diiwaangeliyaan dhaqaalaha Shirkadda. Ku been abuurka diiwaanada iyo dukumiintiyada waxay qatar gelineysaa awooda aan u leenahay gudashada waajibaadkaan. Sidaa darteed:**

- Qaansheegyadu waa inay had iyo jeer ahaadaan kuwo sax ah, oo dhammeystiran, oona ka tarjumaya qiimaha dhabta ah ee lagu iibiyay alaabada iyo adeegyada Shirkadda.
- Shaqaaluhu waa inaysan ujeedo kasta marnaba u abuurin ama u haysanin lacag aan la diiwaangelinin, hanti, waajibaadyo ama deymo.
- Warbixinnada kharashyada iyo qaan-sheegyada loo soo gudbiyey dib-u-bixinta lacagta iyo lacag bixinta waa inay had iyo jeer ka tarjumaan nooca runta ah, ujeedada iyo xaddiga walxaha ku qoran warbixinta ama qaan-sheegashada.
- Lacag bixinta shirkada nooc kasta ha noqotee waxaa la samayn karaa oo keliya kadib markii dukumentiyo munaasib ah la soo gudbiyo uuna oggolaado shakhsi idman.

## D. Fursado Shaqo ee Loo Siman Yahay

CONMED waxay siin doontaa fursado shaqo ee loo siman yahay dhammaan shaqaalaha iyo codsadayaasha shaqada iyadoo aan loo eegayn isirka, midabka, diinta, jinsiga, asalka qaran, da'da, naafonimada ama hiddaha iyadoo la raacayo dhammaan sharciyada federaalka, gobolka iyo kuwa deegaanka ee khuseeya ganacsigeeda. Waxay si cad u mamnuucdaa nooc kasta oo ah kadeedis ku saleysan isir, midab, diin, jinsi, nooca galmada, aqoonsiga ama muujinta jinsi, asalka qaran, da'da, macluumaadka hidaha, naafonimada, ama xaaladda halyeeynimada.

## E. Iskhilaafka Danaha

"Iskhilaafka danaha" waxay dhacdaa marka danta shakhsiyadeed ee shakhsiga aysan jaanqaadayn, kahortagto ama faragalin ku sameysa ama u muuqata mid aan la jaanqaadayn, kahortagayso ama faragelinayso danaha Shirkadda. Iskhilaafka danaha ayaa la mamnuucay marka laga eego siyaasadda Shirkadda, inay Shirkadda ansixiso mooyee. Gaar ahaan, shaqaale, sarkaal ama agaasime waa inuusan marnaba u adeegsan ama isku deyin inuu u adeegsado jagadiisa ama jagadeeda Shirkadda si uu faa'iido shaqsiyadeed ee aan haboonayn u helo isaga ama ay u hesho iyada, qoyskiisa qoyskeeda, ama qof kale. Shaqaale kasta, sarkaal ama agaasime kasta oo ka warqaba iskhilaafka danaha ama faa'iido shaqsiyadeed ee aan habooneyn ama ka walwalsan in iskhilaaf yimaado, waxaa looga baahan yahay inuu si dhaqso ah ugala hadlo arrinta Waaxda Sharciga ee CONMED.

**Waa maxay Iskhilaafka Danaha? Iskhilaafka danaha ayaa noocyo badan leh, laakiin kuwa ugu caansan waxaa ka mid ah:**

- Danta lahaanshaha shirkad kastaa oo CONMED kula tartamaysa ganacsigeeda ama hawlaheeda (oo aan ahayn tirada caadiga ah ee shirkadaha dadweynaha ka ganacsadaan).
- Ka aqbalida ama ka helida hadiyado ama madadaalo alaab-qeybiyeyaasha ama macaamiisha.
- Ahaanshaha sarkaal ku-simaha ah, agaasime, shaqaale ama la-taliye adigoo metalayso shirkad kale oo aan ahayn CONMED.
- Xiriir qoys ama mid jaceyl ah oo lala yeesho shaqaale jaga hoose ah, alaab-qeybiye ama macaamiil.

## F. Fursadaha Shirkadeed

Shaqaalaha, saraakiisha iyo agaasimayaasha waxaa ku waajib ah Shirkadda inay horumariyaan danaha ganacsiga Shirkadda markay fursad ay ku sameeyn karaan soo marto. Shaqaalaha, saraakiisha iyo agaasimayaasha waa laga mamnuucay inay qaataan (ama u jiheeyaan dhinac saddexaad) fursad ganacsi oo muhiim ah taasoo la ogaaday iyadoo loo adeegsanayo hantida, macluumaadka ama jagada shirkadda, haddii Shirkadda horey loo siiyay fursadda oo ay si dhab ah kama

dambeyna ah u diiday la mooyee. Guud ahaan, shaqaalaha, saraakiisha iyo agaasimayaasha ayaa laga mamnuucay inay hantida, macluumaadka ama jagada shirkadda u isticmaalaan helida faa'iido shaqsiyadeed oo aan habooneyn iyo inay la tartamaan Shirkadda.

Mararka qaarkood way adag tahay in la kala saaro faa'iidooyinka shaqsiyadeed iyo kuwa Shirkadeed, mararka qaarna waxaa howlaha qaarkood ku jira faa'iidooyinka shaqsiyadeed iyo shirkadeed labadaba. Habka kaliya ee caqligalka ah oo ay ku dhaqmi karaan shaqaalahayaga, saraakiishayaga iyo agaasimayaashayaga waa in la hubiyo in u adeegsiga hantida ama adeegyada Shirkadda hawl aan u faa'iidaynayn Shirkadda kaliya ay horay u ansixiso Waaxda Sharciga ee CONMED.

## G. Ilaalinta iyo Isticmaalka Haboon ee Hantida Shirkadda

Dhammaan shaqaalaha, saraakiisha iyo agaasimayaasha waa inay ilaaliyaan hantida shirkadda ayna hubiyaan isticmaalkooda. Dhammaan hantida Shirkadda waa in loo istcimaalaa kaliya ujeedooyin ganacsi oo sharci ah.

## H. Qarsoodiga

Marka la fulinayo ganacsiga shirkadda, shaqaalaha, saraakiisha iyo agaasimayaasha badanaa waxay ogaadaan macluumaad sir ah ama lahaanshaha ah ee ku saabsan ganacsiga shirkadda, tusaale ahaan, macluumaadka ku saabsan CONMED, kaabayaasheeda ama qaybaheeda, alaab-qeybiyeyaasheeda, dhinacyada iskaashiga la leh iyo shirkadaha suurtagalka ah ee laga yaabo inay iibsato Shirkadda. Marka macluumaadkaas aan guud ahaan la ogeeysiin dadweynaha, ama maalgashadayaasha ama gaar ahaan maalgashadayaasha mustaqbalka, shaqaalaha, saraakiisha iyo agaasimayaasha waa inay dhawraan qarsoodiga dhammaan macluumaadka lagu aaminay, marka laga reebo marka shaacinta la fasaxay ama sharci ahaan waajib ku tahay.

Waa muhiim in macluumaad kasta oo aan dadweynaha loo shaacin loo xafido si qarsoodi ah, maaddaama ay cawaaqib xun uga imaan karto Shirkadda shaacinta macluumaadka qarsoodiga ah. Sidoo kale, waxaa jiri kara cawaaqib xun oo soo gaari karo shaqaale kasta oo shaaca ka qaada macluumaadkan qarsoodiga ah, ha noqoto ula kac ama si ula kac la'aan.

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah oo ku saabsan waajibaadka qarsoodiga, fadlan la xiriir wakiilkaaga Shaqaalaha. Ama, waxaad la xiriiri kartaa Waaxda Sharciga.

Macluumaadka sirta ah, macluumaadka lahaanshaha iyo sirta ganacsiga ayaa muhiim u ah danaha iyo guusha CONMED. Macluumaadka Sirta ah, macluumaadka lahaanshaha, iyo sirta ganacsiga waxa ku jira, laakiin kuma eka:

- Macluumaadka ama xogta sharciyan looga baahan yahay Shirkadda ama qandaraaska qarsoodiga ah.
- Macluumaadka maaliyadeed ee ku saabsan Shirkadda iyo waxqabadkeeda.
- Macluumaadka ku saabsan qorshayaasha ganacsi ee Shirkadda, saadaasha, miisaaniyadda, fidinta, qaadashada ama iibinta, iyo alaabada cusub ee suurtagalka ah, suuqyada ama macaamiisha.
- Macluumaadka ku saabsan mashruucyada cilmi baarista iyo horumarka iyo codsiyada baatentiga/laysinka xaq u-lahaanshaha.
- Xogta sayniska, natiijooyinka sheybaarka, xogta caafimaadka iyo xogta kale ee daraasadda.

Marka laga reebo ku xadgudubka Xeerkan Dhaqanka Ganacsiga iyo Anshaxa, shaacinta aan la fasaxin ee macluumaadka qarsoodiga ah waxay noqon kartaa ku xadgudubka waajibaadka qandaraaska ama sharciyada federaalka taasi oo u keeni karta ciqaab madani iyo mid dembiyeed Shirkadda iyo shaqsiga shaacinayo macluumaadka labadaba.

## I. U hogaansanaanta sharciyada, Xeerarka iyo Qawaaniinta

### (Oo ay ku jiraan Sharciyada Ganacsiga ee Loogu Talagalay Dadka Gudaha Kujiro)

Waa siyaasadda Shirkadda in loo hogaansamo dhammaan sharciyada, xeerarka iyo qawaaniinta khuseeya. Waa mas'uuliyadda shaqsiyeed ee shaqaale kasta, sarkaal kasta iyo agaasime kasta inay u hoggaansamaan heerarka iyo xaddidyada ay soo rogeen sharciyadaas, xeerarkaas iyo qawaaniintaas. Shuruudahan ayaa udhaxeeya u hogaansanaanta maalgashiga saamiyada, shuruudaha Sharciga Cunnada iyo Dawooyinka, waajibaadka Sharciga Dhaqanka Musuqmaasuqa ah ee Ajnabiga iyo sidoo kale dhammaan shuruudaha kale ee sharciga ah ee saameyn ku yeelan kara ganacsigayaga. Waxaa jira saddex qaybood oo ah u hoggaansanaanta marka la eego sharciyada maalgashiga saamiyada: (i) Shaacis-la'aanta iyo Isticmaal-la'aanta Macluumaadka Gudaha; (ii) Xaddidaadaha Shaacinta; (iii) Dheeriga

## Xaddidida Kuwa Ku Lugta Leh

Waqti ka waqti, shaqaalaha waxaa loo soo bandhigi karaa ama ay heli karaan "macluumaadka dadweyne ee muhiimka ah" marka la raaco sharciyada maalgashiga saamiyada. In kasta oo weedhu aysan koobnayn, guud ahaan waxaa loo fahamsan yahay inay khuseeyso macluumaad kasta oo aan ahayn mid dadweyne kaas oo maalgashi macquul ah uu tixgelinaya marka uu gaarayo go'aan maalgashi. Ujeeddooyinkan awgood, macluumaadka looma baahna inuu noqdo mid aad u muhiim ah oo beddel ku keenayo go'aan maalgashi. Balse, way ku filan tahay in maalgashadaha "uu tixgelin" karo

macluumaadka marka uu gaarayo go'aan maalgashi. Guddiga Maalgashiga Saamiyada iyo Sarifka (Securities and Exchange Commission, “SEC”) ayaa qaba aragtida ah in noocyada macluumaadka soo socda, iyadoo ku xiran duruufaha, loo qaadan karo inay yihiin muhiim: (1) macluumaadka dakhliga; (2) mideynta, qaadashada iyo isbeddelada hantida; (3) alaabo cusub ama horumarin ku saabsan macaamiisha ama alaab-qeybiyeyaasha; ama (4) qandaraasyo muhiim ah oo lala yeesho macaamiisha.

Waqti kasta, shaqaale fara badan ayaa laga yaabaa inay ka warqabaan macluumaad aan ahayn mid dadweyne oo ku saabsan hal ama in ka badan qeybahaan. Hadduu macluumaadkaasi yahay "muhiim" waa gunnaanad sharci ah oo laga yaabo inay khuseeyso tixgelinta qodobo kuwaas oo laga yaabo in dhammaan shaqaalaha aysan warqabin, waxaana laga yaabaa inay matasho gunnaanad uu dhinac saddexaad gaarayo kadib marka la fahmo xaqiiqda faa'iidada dhacda kadib.

Dhab ahaan, haddii aad su'aal ka qabtid ama shaki ka qabtid inaad haysao, macluumaad dadweyne oo muhiim ah, waa inaad u qaadataa inaad hayso, oo aadan, si toos ah ama aan toos ahayn, ku lug yeelan wax is-weydaarsi ganacsi ah, nooc kasta oo maalgashiga saamiyada CONMED (haddii ay ahaan lahaayeen saamiga, iibsiga saamiyada, ikhtiyaarada iibsiga saamiyada, ama xulashooyinka iibsiga saamiyada). Sidoo kale waa inaad ka taxadartaa inaadan u shaacin qof waxkasta oo ah macluumaadka aan ahayn mid dadweyne. Dadka jabiya xeerarkan naftooda khatar ma gelinayaan kaliya marka la raaco siyaasadaha CONMED, balse waxaa laga yaabaa inay geysteen, ama ka caawiyeen dhinac saddexaad gelista ficil dambi ah oo badanaa loo yaqaan "ganacsiga leh xiriirka gudaha".

Shuruudo dheeri ah ayaa khuseeya shirkadaha "gudaha" kuwaas oo gaar loo ogeysiiyey waajibaadkooda dheeriga ah. Haddii aad qabtid wax su'aalo ah oo ku saabsan siyaasada CONMED ee arrintan la xiriira, ama aad ogaato wax kasta oo xadgudub ku ah siyaasada, waa inaad isla markiiba la xiriirtaa Waaxda Sharciga ee CONMED.

Waa siyaasada CONMED in wax “macluumaadka dadweyne ee muhiimka ah” aan la soo bandhigin marka laga reebo tirada kooban ee saraakiisha shirkadaha ee loo idmaday inay bixiyaan shaacintaas iyagoo ka wakiil ah Shirkadda. Shaqaalaha badankood, oo ay ku jiraan dhammaan saraakiisha iyo shakhsiyaadka heli kara macluumaadka dadweyne ee muhiimka ah, tani micnaheedu waa in shaqaaluhu ay hayaan sirta Shirkadda iyo macluumaadka qarsoodiga ah, oo aysan isticmaalin macluumaadka noocan ah.

### J. Waajibka Soo Sheegista Xadgudubyada; Sida Loo Soo Sheego Xadgudubyada; Warbixinta Qarsoon

Agaasime kasta, sarkaal ama shaqaale kasta oo ogaada jiritaanka ama suurtogalnimada ku xadgudubka sharciyada, xeerarkan, qawaaniinta ama Xeerkani waxaa looga baahan yahay inuu si dhakhso ah usoo wargaliyo La Taliyaha Guud ee CONMED, Agaasimaha U hoggaansanaanta ama Khadka Shirkadda Ka gaabinta in sidaas la sameeyo lafteeda ayaa xadgudub ku ah Xeerkan. Si loogu dhiirigeliyo shaqaalaha inay soo sheegaan wixii xadgudub ah, Shirkadda ma oggolaaneyso aargoosi ku aadan warbixinnada lagu gudbiyay niyad wanaagsan. Haddii ay suurtagal tahay, warbixinnada waa in lagu soo gudbiyaa hadal ahaan ama telefoon ahaan ama shaqsi ahaan. Haddii aysan tani macquul ahayn sabab awgeed, ula xiriir Waaxda Sharciga ee CONMED wixii faahfaahin ah ee ku saabsan sida warbixinnada loogu soo gudbiyo iimayl, warqad caadi ah ama fakis. Haddii ay lagama maarmaan tahay, warbixinnada xadgudubka waxaa lagu soo gudbin karaa si qarsoodi ah iyadoo la adeegsanayo khadka tooska ee shirkadda. Nuqulada dhammaan warbixinnada qarsoon waxaa loo dhiibi doonaa Guddiga Hantidhawrka ee Golaha Agaasimayaasha.. Shaqaalaha aan hubin in xaalad xadgudub ku tahay Xeerkani waa inuu kala hadlaa xaaladdaas waaxda sharciga si looga hortago isfaham darro iyo ceeb imaan karto mustaqbalka.

## II. Ka-reebitaannada iyo Tanaasulaada

Waqti ka waqti, waxaa laga yaabaa inay wanaagsan tahay ama danta ugu wanaagsan ee Shirkadda ay ku jirto in la oggolaado tanaasul ama ka-reebid ku aadan qodob Xeerkan ah. Xaaladahan oo kale, shaqaale, ama sarkaal raadsanaya tanaasulaad waa inuu la xiriiraa Waaxda Sharciga ee CONMED taasoo bixin kara ka-reebitaankaas ama tanasulaadkaas. Ka-reebitaa ama tanaasulka Xeerka ee loogu talagalay saraakiisha fulinta ama agaasimayaasha Shirkadda waa in lagu sameeyaa qoraal iyadoo loo qorayo Guddiga Agaasimayaasha ama guddi ka mid ah Guddiga, kuwaas oo laga rabo inay shaaciyaan dhammaan ka-reebitaanada ama tanaasulaada la siiyay saamileyaasha CONMED.

## III. Iaalinta Warbixinada Niyadda Wanaagsan ah ee Ku Xadgudubka Siyaasadaha ama Sharciyadaha

Waxay ka soo horjeedaa siyaasada Shirkadda in shaqaale uu siidaayo, diido, hakiyo, u hanjabo, dhibaateeyo, nooc kasta ku takooro ama uu qaado tallaabo shaqo oo xun oo looga aargudanayo shaqaale soo sheegayo ku xadgudubka siyaasadahan, si sharci ah u bixinayo macluumaad ama haddii kale caawinayo baaritaan kaas oo shaqaaluhu si macquul ah u aamminsan yahay inuu yahay ku xadgudubka siyaasadahan ama khayaano ka dhan ka ah saamilayda ama noocyada kale ee khiyaamada. Haddii shaqaale uu rumeysan yahay inuu isaga ama iyada la kulmay ficil shaqo oo xun oo ay sababtay warbixin lagu sameeyay niyad wanaagsan oo ah ku xadgudubka siyaasadaha ama sharciyada Shirkadda, isaga ama iyadu waa inay isla markiiba la xiriiraan Waaxda Shaqaalaha iyo Waaxda Sharciga ee CONMED.

Iyadoo ku salaysan hagida Lataliyaha Guud, shaqaalaha mas'uulka ka ah ayaa dib u eegi doona oo baari doona dhammaan shaaciyada la rumeysan karo ee ficilka qaldan ee la tuhunsan yahay si loo xaqiijiyo jawaabta ku habboon. Baadhitaannada waxaa loo samayn doonaa si qarsoodi ah illaa inta suurogal ah. Edbinta ku xadgudubka Xeerkan waxaa go’aamin doona maamulka ku haboon kadib la tashiga Waaxda Sharciga, Waaxda Shaqaalaha, iyo Gudiga U hogaansanaanta CONMED.



# Xeerka Dhaqanka Ganacsiga iyo Anshaxyada

525 French Road, Utica, NY 13502

Adeegga Macaamiisha: 866-4CONMED
Iibka Caalamiga ah: 727-214-3000
Fakiska: 1-800-438-3051

Bogga Internetka: www.CONMED.com
Iimaylka: Customerexperience@conmed.com
Caalamiga: internationalorders@conmed.com

© Xuquuqda Daabacaada 2019 Shirkadda CONMED. Dhammaan Xuquuqda Waa La Dhowray.